

Waxbarashada dadka waaweyn

Waxbarashada dadka waaweyn waa hadba ka imanaysa baahida shaqsiga waxbaranaaya. Macnehedu waxay tahay in waxbarashadu ay noqoto mid is bed-bedel leh, iyo in dhammaan dadku ay helaan hab iyaga ku habboon oo ay wax u baran karaan. waqtiga waxbarashadu wuxuu noqon kara mid dhaqso ah ama mid aan sidaa u deg deg ahayn, Waxbarashad dadka waaweyn waxaa la dhigan kara maalintii ama habeekii, ama aqoon dirsi dhan ama dhiman.(Waa waxbarashada qofku gurigiisa ku qaato mid am nuf)

Maamulka degmada ayaa mas´uul ka ah in dadweynaha xaqa u leh dhigashada waxbarashadan ay waxbarashadan helaan, iyaga ayaa waxbarashada abaabuli kara, ama ka

iibsan karo isku-dubbarideha ama ciddii hawshan fulin lahayd ee wadi lahayd.

Waxbarashada dadka waaweyn

Waxbarashada dadka waaweyni waxaa weeyaan:

- Waxbarashada aasaasiga ah.
- Waxbarashada dugsiga sare ee dadka waaweyn.
- Barashada Af-iswiidishka oo loogu talo galay dadka waddanka ku cusub (sfi).
- Waxbarashada aasaasiga ah iyo waxbarashada sare ee da´weynta oo loogu talo galay dadka baahida gaarka ah qaba (särvux).
- Waxbarasho ku biirsashada (Aqoon korodhsiga ah.)
- Dhammaystiridda waxbarashada.

Waxbarashada aasaasiga ee da´weynta (dadka waaweyn)

Waxbarashada aasaasiga ee da´weyntu wuxuu ku heer yahay dugsiyada biloowga ah hoose-dhexe ee qasabka ah. Qaabka waxbarashadu wuu kala duwanaan karaa.

Waxbarashadu waxay u habaysan tahay koorsooyin iyo maaddooyin, qaybaha kala duwan ee cilmiga. Af iswiidish ama af iswiidishka luqad labaad ahaanta loo barto, af ingriisi, xisaab, barashada cilmiga bulshada, barashada cilmiga diinta, taariikh, geograafi, fiisigs, kimistri, bajoologi, barashada cilmiga hoyga iyo nolosha.

Waxbarashadani waa in ay siisaa qofka aqoon ku filan oo uu kaga qayb qaato bulshada iyo suuqa shaqada. Teeda kale waxay suurtagelin karta sii wadashada waxbarashada. Laga bilaabo bisha luulyo markii qofku uu 20 sano buuxsado, wuxuu xaq u leeyhay dhigashada waxbarashada aasaasiga ee dadka waaweyn.

Heerka waxbarashada u ka bilaabayaa waa arrin ku xiran khibrada, aqoonta iyo baahida u gaarka ah waxbartaha. Waxbarashadan iyo waxbarasho kale ayaa la isla wadi kara, waxa kale oo lagu wadi karaa shaqo ama tababbar, maadama qofka wax baranaayaa uu iskiisa u go´aansaday waqtiga waxbarashada.

Waxbarashada sare ee dadka waaweyn

Waxbarashada dadka waaweyn ee sare waa in laga hela aqoon gaadhsiisan heer dugsi sare ah.

Dhigashada waxbarashada sare ee da'weynta wuxuu qofku u qalma markii:

- Laga bilaabo 1:da luulyo marka uu qofku 20 sano u buuxsado ama uu
- dhamaysatay waxbarashada barnaamij qarmeedka ee dugsiga sare ka dhamaystay waxbarasho la mid ah.

Koorso kasta waa in qofku:

- uu san hayan ama ay jirto cillada aqoonta koorsada u ka heli doono.
- u leeyahay awood u koorsada si joogto ah ugu qaybgalo.

Waxbarashada aasaasiga ee da´weynta, waxaa siiba loogu talagalay dadka aan helin fursad ay ku dhigtaan dugsi sare ama doonaya in ay dhammaystirtaan wixii ka dhiman, xataa kuwa dhamaystay way dhigan karaan. Ujeedada xaaladaas waxay tahay helida shahaado ka heer sarraysa shahaadadii hore ama dhigashada maaddo cusub oo uu qofku ku qaato waxbarashada dadka waaweyn.

Barashada luqadda af-iswiidishka oo loogu talogalay dadka waddanka ku cusub (sfi)

Barashada luqadda af-iswiidishka oo loogu talogalay dadka waddanka ku cusub waa barashada bilowga ah ee luqadda iswiidishka.

Dhammaan dadyoowga degmo ka diiwan gashan oo aana haysan aqoonta saldhigga u ah ee luqadda iswiidishka, waxay xaq u leeyihiin dhigashada barashada luqadda af-iswiidishka ee loogu talogalay dadkaa waddanka ku cusub (sfi), laga bilaabo 1:da bisha luuyo sannadka 16 sano buuxsadaan.

Dadyoowga doonaaya in ay dhigtaan barashada luqada af-iswiidishka loogu talogalay dadka waddanka ku cusub waxay kala xiriiri karaan maamulka degmada. Hogaamiyeha tacliiinta iyo xirfadaha ee dugsiga degmada ayaa ka caawini kara qorsheynta waxbarashada.

Barashada luqada af-iswiidishka loogu talaggalay dadka waddanka ku cusub iyo waxbarasho kale, jihaynta shaqada ama tababbar shaqo ayaa laysku wadi kara. Barashada luqada af-iswiidishka ee loogu talaggalay dadka waddanka ku cusub ayaa la dhigan karaa iyadoo ardaygu isla markaas qaadanaayo magdhowga jirroelahala, laysla wadi karaa dhaqdhaqaaqyada daryeelka caafimaadka iyo jorrelha laga helo.

Waxbarashada aasaasiga iyo waxbarashada sare ee dadka waaweyn oo loogu talagalay dadka dhibaatada gaarka ah dadka cillinka ah(särvux).

Waxbarashada aasaasiga iyo waxbarashada sare ee dadka waaweyn oo loogu talagalay dadyoowga u dhibaatooyinka gaarka ah qaba (särvux) waxaa loogu talagalay dadyoowga doonaaya in taclintooda ay dhamaystaan. Waxabarashada [särvux] gaarka ah ee dadka waaweyn waxaa la heli kara laga bilaabo 1:da bisha luuyo sannadka qofku uu 20 sano buuxsado.

Waxbarashada waxay ka kooban tahay koorsooyin gooni gooni ah, ee lagu helo aqoonta heer lamid ah kuwa dugsiyada gaarka ee qasabka ah iyo barnaamij qarmeedka dugsiga sare ee gaarka ah. Waxaa la dooran kara dhigashada oo ka kooban hal koorso ama dhowr koorsooyin.

Waxbarashada aasaasiga iyo waxbarashada sare ee dadka waaweyn oo loogu talogalay dadyoowga dhibaatada gaarka ah qaba, waa xaq ku leh qofka cillinka ah (dhibka gaarka ah qaba) oo aana haysan aqoonta waxbarashada ee dugsiyada gaarka ah ee qasabka ah laga helo. Waxbarashada sare ee dadkawaaweyn oo loogu talagalay dadka qaba baahida gaarka ah, waa waxbarasho loogu talagalay dadyoowga tacliintooda ku soo dhamaystay dugsiyada sare ee gaarka ha. Waxbarashada sare ee dadka waaweyn oo loogu talagalay dadyoowga qaba baahida gaarka ah, wuxuu u dhigmaa waxbarashada barnaamij qarmeedka iyo barnaamijyada habka gaarka ah u dejisan dugsiyada sare ee gaarka ah.

Waxbarasho ku biirsashada

Waxbarasho ku biirsashada waa waxbarasho xirfadeed, oo lagu soo bandhigo waxbarashada dadka waawey ee maamulka degmooyinka. Waxbarashada waxay dadka waawey uu suurtagelineysa helida heer-xirfadeed cusub ama helida xirfad cusub.

Xirfadahaas waxaa tusaale ahaan kamid ah macallinka traafikada [trafiklärare], baabur-wade gaadidka dadweynaha [yrkesförare persontransporter], bas-wade, xoghaayeha ardayda [elevassistent] iyo carruur-xannaaneeye [barnskötare].

Waxbarashada waxaa la dhigtaa inta u dhaxeeysa 10 ilaa 60 toddobaad, kuna suurtagasha wadashaqaynta laamaha ganacsiga ee dalka.

Dhamaystirashada waxbarasho

Dhamaystirashada waxbarasho waa hab waxbarasho oo an ka tirsanayn hab-dhiska waxbarashada guud. Dhamaystirashada waxbarasho maamulka degmadu

ma maamulo, ee waxa maamulo Isku-dubbarideha waxbarashada, kaaso dowladda kaalmo-dhaqaaleedka ka helo.

Waxbarashada shahaado rasmi ah laguma helo, taaso suurtagelin lahayd sii wadashada waxbarashada, ee waxaa weeyaan waxbarashado dhamaystirasho qabyo ka ahayd tan dugsiga sare, badi ahaan waxaa laga barta maaddo ama xirfad gaar ah.

Isku-dubbaridaha waxbarashada tiradooda qiyaastii waxa 150, kuwasoo soo bandhiga waxbarasho kala duwan, tusaale ahaan barashada farshaxanka, farsamo iyo masrixiyad.

Waxbarashada badidooda lacag ayaa la bixiya, qaar kuwaas kamid ah waxaa lagu heli kara kaalmo-dhaqaaleedka waxbarashada loogu talagalay. Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan kharashka waxbarashada iyo kaalmo-dhaqaaleedka waxbarashadan waxa laga heli kara isku-dubbarideha ay waxbarashada arrintani khuseeyso ama haya.

Dhigashada waxbarashada dadka waaweyn

Waxbarashada dadka waaweyn waxaa laga codsan kara maamulka waxbarashada dadka waaweyn ee degmada waxbartaha laga helo. Badi ahaan waxaa warbixin ku saabsan sida loo helo waxbarashada laga akhrisan kara hoyga Internetka ee maamulka degmada.

Badi ahaan waxaa la heli kara imtixaanka aqoontii tan iyo berri hore la haystay, taaso surtagelineeysa doorashada heerka ku habboon waxbarashada, ama in hoos loo dhigo xilliga waxbarashada.

Hogaamiyeha tacliiinta iyo xirfadaha ee dugsiga [studie- och yrkesvägledare] ee waxbarashada dadka waaweyn wuxuu waxbartaha ka caawini karaan qorsheynta waxbarashada.

Qofka doonaayo in uu dhigto waxbarashada dhamaystirashada waa in uu la xiriira isku-dubbarideha waxbarashada.

Warbixin dheeraad ah:

Hoyga Internetka ee maamulada degmooyinka iyo gobollada waxaad ka heleysa adreesyada degmooyinka dalka Iswiidan.
www.skl.se

Deegaanka waxbarashada

Deegaanka waxbarashada wanaagsan wuxuu muhim u yahay ka helida dugsiga iyo helida kartida waxbarashada.

Deegaanka waxbarashada wuxuu ku xiran yahay arrimo badan oo kala duwan, tusaale ahan qolka, qalabka, iftiinka, dhawaaqa iyo hawada ba door wayn bey leeyihiin. Xataa xawaaraha waxbarashada, nidaamka dugsiga – kuwa qoran iyo kuwa an qornayn ba. Sidaaso kale wada-shaqaynta kooxaha iyo shaqsiyaadka kala duwan waa arrimo saamayn wayn ku lahaan karaan caafimaadkayaga markii an dugsiga ku suganahay.

Xeerka deegaanka shaqada [Arbetsmiljölagen] ayaa dugsiyada dhammaantood lagu dhaqma – sida goobaha shaqada oo kale.

Warbixin dheeraad ah:

Hey'adda ammuuraha deegaanka shaqada [Arbetsmiljöverket] ayaa waxaa laga akhrisan kara warbixin ku saabsan Xeerka deegaanka shaqada iyo deegaanka waxbarashada dugsiyada loogu talagay dadyoowga waxbarta
www.av.se/teman/skolan

Kharashyada

Dhigashada waxbarashada dadka waaweyn waa lacag la´aan. Laakinse maamuleha wuxuu xaq ku leeyahay in waxbarataha u ka qaado kharash gaar ah, sida qalab, dharka shilalka looga badbaado iyo qalabyo kale, kuwaso waxbarte kasta uu adeegsado una hanti ahaan u haysan karo.

Maamulku wuxuu kaloo xaq ku leeyahay in waxbartaha u ka qaado kharash, sida markii goob la booqanaayo.

Haseyeeshe dhamaystirashada waxbarasho waxaa la bixiyaa kharashka koorsada.

Shahaado

Shahaadadda waxaa bixiyo macallinka. Haseyeeshe, intii uusan shahaadadda bixin waa in uu qofka wax baranaayo wargeliya xaalada waxbarashadiisa, iyo shuruuda shahaadooyinka kala duwan lagu helo.

Macallinka waa in uu macneeya sida uu shahaadadda u qiimeeyay. Shahaadadda rafcaan lagama qaadan karo, laakinse sal-gaarida koorsada waa laga arrinsan kara.

Qoraalka shahaadooyinka isku aruursan

Dadyoowga dhamaystay koorsooyin kala duwan waxay xaq ku leeyihiin in la siiyo qoraalka shahaadooyinka isku aruursan, kaaso lagu xaqiijinaayo koorsooyinkii ama nus koorsooyinkii uu qofku dhamaystay, iyo shahaadada koorsa kasta laga siiyay.

Qofka dhigtay koorso gaar ah ama koorsada jihaynta, ama doonaayo in aqoontiisa siyaabo kale oo an ahayn qaab shahaado loogu soo bandhigo, wuxuu xaq ku leeyahay in qoraal caddayn ah la siiyo. Qoraalka caddaynta waxaa bixiyo agaasimaha dugsiga.

Waxbarashada aasaasiga ee dadka waaweyn

Shahaado waxaa la bixiyaa markii koorso ama nus koorso la dhamaysto. Waxbarteyaasha shahaado ka haysto dhammaan qaybaha hal koorso, wuxuu heli kara shahaado ay ku xusan san tahay shahaadooyinka koorsada oo idil.

Waxaa jirto saddex nooc oo shahaado ah: ku guulaystay [G], aad ugu guulaystay [VG], iyo kuma guulaysan [IG].

Markii waxbarteha uu ku guulaysto barashada maaddooyinka ugu muhimsan dhammaantood, waxaa la siinayaa shahaadadii ugu danbeeysay. Ujeedada waxbarashada waxaa gaari karo qofkii ku guulaysaty helida ugu yaran shahaadada ku guulaystay [G]. Maaddooyinka ugu muhimsan waxaa kamid ah af iswiidishka , af iswiidishka luqad labaad ahaanta, af ingriisi, xisaab iyo aqoonta bulshada, iyo maaddooyin kale.

Waxbarashada sare ee dadka waaweyn

Shahaado waxaa la bixiyaa markii koorso ama nus koorsada hawllo mashruuc ku salaysan la dhameeyay. Waxbarteyaasha shahaado ka haysto dhammaan qaybaha hal koorso, wuxuu heli kara shahaado ay ku xusan tahay shahaadooyinka koorsada oo idil.

Waxbarashada sare ee da'weynta waxaa jirto afar nooc oo shahaado ah: ku guulaystay [G], aad ugu guulaystay [VG], aad iyo aad ugu guulaysaty [MVG] iyo

kuma guulaysan [IG]. Shahaadada waxaa loo bixiya hadba ujeedada waxbarashada iyo astamaha shahaadada u dejisan qorsheha koorsooyinka.

Qofka dhamaysaty dhigashada koorsooyinka maaddooyinka ugu muhimsan dhammaantood (600 dhibcood heer dugsi sare) iyo koorsooyinka kale, nus koorso ama kuwa hawllo mashruuc ku salaysan oo sida hadba qorsheha koorsada isku-darkii ugu yarantii helay 1750 dhibcood heer dugsi sare, wuxuu xaq ku leeyahay shahaadada ka qallin-jebinta waxbarashada da'weynta oo heer dugsi sare ah (isku-darkii 2 350 dhibcood heer dugsi sare).

Maaddooyinka ugu muhimsan ee waxbarashada sare ee da'weynta waa isla maaddooyinka ugu muhimsan ee laga helo barnaamij-qarmeedka dugsiyada sare, ka reeban kuwa isboortiga, caafimaadka, quruxda iyo farshaxanka oo idil.

Waxbarasho ku biirsashada

Natiijada koorsooyinka waxbarasho ku biirsashada waxaa lagu soo bandhiga shahaadada qallin-jebinta . Shahaadada qallin-jebinta waa in lagu soo lifaaqa liis u ku qoran yahay ujeedada iyo jihada-xirfada ee waxbarashadas. Shahaadada waxaa la bixiyaa koorso kasta markii ay dhamaato. Heerarka shahaada waa ku guulaystay [G], aad ugu guulaystay [VG], iyo kuma guulaysan [IG].

Waxbarasho dhamaystirashada

Isku-dubbarideha waxbarahada wuxuu ka qaybgaleyaasha waxbarashado dhamaystirashada siiyaa shahaado, ama qoraal caddayn ah oo u ku qoran yahay qiimaynta dugsi kasta uu gaar ahaan u go'aamiyay. Dugsiyada badidooda waxay bixiyaan shahaado.

Maadama dugsiyada ay tixraacayan qorsheha koorsooyinka qarmeed, ayuu qoraalka caddaynta waxbarashada aysan ahayn shahaado rasmi ah. Sidaas awgeed, qiimaynta qallin-jebinta laguma helo dhibicyo lagu tiirsan karo markii waxbarashada heer sare ah la codsanaayo.

Luqada af-iswiidishka loogu talaggalay dadka waddanka ku cusub

Shahaadada luqada af iswiidishka loogu talaggalay shisheeyaha waa laba nooc: ku guulaystay [G] iyo aad ugu guulaystay [VG]. Haddii waxbarteha usan ku guulaysan helida shahaadada G, waa in macallinku uu qoraal caddayn ku xusa heerka aqoonta waxbarteha hadba ujeedada koorsada.

Waxbarashada aasaasiga iyo waxbarashada sare ee dadka waaweyn oo loogu talagalay dadyoowga u dhibaataysan gaarka ah qaba [Särvux]

Shahaadada waxaa la bixiya kadib markii waxbarteha u koorsada ama nus koorsada dhamaysto, kuwaso u dhigma heerka waxbarashada aasaasiga ee da'weynta oo loogu talagalay dadyoowga u dhibaataysan cillada korniinka ama waxbarashada sare ee da'weynta oo loogu talagalay dadyoowga u dhibaataysan cillada korniinka

Qaybaha [Särvux] u dhigma dugsiga tababbarka waxbarashada aasaasiga ee da'weynta oo loogu talagalay dadyoowga u dhibaataysan cillada korniinka waa in waxbarteha shahaado la siiyo markiii koorsada u dhamaysto, taaso lagu caddaynaayo in uu koorsada ka qaybgalay.

Shahaadada dugsiga [Särvux] waa laba nooc: ku guulaystay [G] iyo aad ugu guulaystay [VG]. Haddii waxbarteha usan ku guulaysan helida shahaadada G, waa in macallinku uu qoraal caddayn ku xusa in waxbarteha uu san ku guulaysan helida shahaadada G.

Taageero dheeraad ah

Qofka dareenkiisu u yahay in uu baahan yahay taageero dheeraad ah, wuxuu arrinta kala xiriiri kara macallinka ama hogaamiyeha xirfadaha [yrkesvägledare]. Wadajir ayee ugu heshiin karaan qorsheha waxbarashada, iyo ujeedada laga salgaari doono, iyo sida loo gaari doono. Dhibaatada waxaa xal loogu heli kara haddii koorsada lagu dhigto hab ka sii xasilisan ama koorsada gebi ahaan la ciribtiro ama lagu beddeli mid kale.

Qofka carruur leh ama shaqeeyo – ama labada ba – wuxuu haysta fursad u ku dhigto habeenadii ama hal gelin. Waxbarteyaasha dhigata waxbarashada da'weynta ee degmada waxay haystaan fursad ay dugsiga ku dhigtaan iyago aqalkooda ku sugan. Hogaamiyeha waxbarashada iyo xirfadaha [Studie- och yrkesvägledaren] ee ku sugan maamulka degmada ayaa laga heli kara warbixin ku saabsan fursadaha jiraan.

Dadka waaweyn tiro badan ayaa laga yaaba in muddo dheer dugsi aysan dhigan, sidaas awgeedna u baahan caawinada farsamada waxbarashada. Qofka caawinaad u baahan wuxuu la xiriiri kara macallinka ama hogaamiyeha waxbarashada iyo xirfadaha [Studie- och yrkesvägledaren].

Muqarraka gaarka ah

Dhammaan dadyoowga dhigata waxbarashada dadka waaweyn waa in ay leeyihiin qorsheha waxbarasho oo gaar ah. Qorsheha waa in la diyaariyaa markii waxbarashada la bilaabo, waxna waa laga beddeli kara xilliga waxbarashada.

Qorsheha waxbarashada waa in lagu xusaa ujeedada waxbarashada u waxbarteha leeyahay iyo tirada dhibicyada uu dhigan doono.

Qorsheha waxbarashada shaqsiyeed waxa wadajir u diyaariyo macallimiinta, hogaamiyeyaasha waxbarashada iyo xirfadaha iyo waxbarteha. Agaasimaha dugsiga ayaa masuul ka ah in arrintas lagu dhaqaaqo.

Imtixaanka sal-gaarida

Dadyoowga dhigata waxbarashada dadka waaweyn ee degmada ka doonaaya shahaado, waxay xaq ku leeyihiin in aqoonta maaddooyinka oo idil imtixaan looga sal-gaaro, waxaase ka reeban koorsooyinka jihaynta, koorsooyinka shaqsiyeed iyo kuwa hawllo mashruuc ku salaysan.

Macneheedu waxay tahay in qofku uu iskiisa koorso u dhigto, kadibna uu galo imtixaan.

Kharashka imtixaanka sal-gaarida ee koorso kasta ugu badnaantii waa 500 karoon. Waxbarteha haysto shahaadada kuma guulaysan [IG], kharash lagama qaado haddii imtixaanku u ku saabsan yahay koorsada uu san ku guulaysan.

Qofku wuxuu samayn kara inta imtixaan sal-gaarid u doono. Heerka shahaadada hoos looma dhigi karo, xitaa haddii usan imtixaanka ku gulaysan.

Waxaa lagu imtixaami kara oo kaliya degmada uu koorsada ka dhigan doono.

Xeerka hogaaminta

Waxbarashada dadka waaweyn waxay ka mid tahay habdhis ujeedo ku hogaansan, mas'uuliyada ugu wayn ay tahay mid gudaheed. Maamulka degmooyinka ayuu xilka ugu wayn ee dhaqdhaqaaqa waxbarasha saaran yahay.

Hogaanka dhaqdhaqaaqa waxbarasha wuxuu ku salaysan yahay dhowr ah qoraallada hogaaminta, hoos waxaa ku xusan dhowr tusaalood:

Xeerka dugsiyada

Xeerka dugsiyada waxaa dejiya baarlamaanka, waxaana ku xusan nidaamka asaasiga ee waxbarashada da'weynta.

Xeer-dowladeed

Waxaa jiro dhowr Xeer-dowladeedyo loogu talagalay waxbarashada da'weynta, tusaale xeer-dowladeedka waxbarashada da'weynta iyo xeer-dowladeedka loogu talagalay waxbarashada xabsiyada.

Muqarrarka (Lpf 94)

Qorsheha waxbarashada oo idil iyaguna waa xeer-dowladeedyo. Qorsheha waxbarashada loogu talagalay dugsiyada ikhtiyaariga (Lpf 94) waxaa go'aamiso dowladda, waxaana ku tilmaaman hawlaha waxbarashada da'weynta, ujeedada guud, iyo qiimeynta saldhig u noqon doonto dugsi dhigashada.

Manhajka

Qorsheha koorso kasta waxaa ku xusan shuruudaha waxbarashada.

Koorso qarmeed kasta ee waxbarashada da'weynta waa in uu jira qorsheha koorsada oo go'aamisay Hey'adda ammuuraha dugsiyada [Skolverket]. Qorsheha koorsada waxaa ku tilmaaman danta iyo ujeedada koorsad laga leeyahay, iyo heerka aqoonta laga doonaayo qofka kadib markii koorsada ay dhamaato. Qorsheha koorsooyinka ee koorsooyinka degmada waxaa go'aan ka gaaro goleha waxbarashada.

Manhajka

Maamulka degmo kasta wuxuu leeyahay qorshe-dugsiyeed, ku tilmaaman sida waxbarashada maamulka degmada loo qorsheyn doono loona horumarin doono. Qoraalkaas waxaa ku xusan tallaabooyinka maamulka degmada u damacsan yahay in uu ka qaado sidii lagu gaari laha ujeedada qarmeed.

Warbixin dheeraad ah:

Hoyga Internetka ee Hey'adda ammuuraha dugsiyada [Skolverket] waxaad ka akhrisan kartaa qoraalka rasmiga ah ee lagu hogaamiyo waxbarashada da'weynta.
www.skolverket.se

Doorashada waxbarashada

Doorashada waxbarashada waa arrin ku xiran danta waxbarashada laga leeyahay. Waxaa dhici karto in qofku uu san berri hore helin fursad uu ku dhigto dugsiyada biloowga-hoose-dhexe, uu na imminka doonaayo in uu aqoon korsado sidii uu dugsi sare ku dhigto, kadibna tacliintiisa sii wato, sida jaamacad ama waxbarasho la mid ah. Kuwa kalena waxay doonayaan in ay korsodaan shahaadada tusaale ahaan maadada ingriisiga ama taariikhda. Sabab kale waxay noqon karta waxbarashada xirfada ama aqoon-korsoshada isla xirfada.

Qofka aaminsan in uu san dooran waxbarasho ku habboon wuxuu la xiriiri kara hogaamiyeha xirfadaha [yrkesvägledare] waxbarashada da'weynta ee maamulka degmada. Hogaamiyeha xirfadaha ayuu xil-saaran yahay in uu caawinno uu na baaro waxa baahida ay tahay. Hogaamiyehu wuxuu kalo qofku siin kara warbixin ku saabsan shuruuda lagu helo waxbarashada kala duwan.

Tacliinta dugsiga sare ku xigta

U qalmid

Ardayo tirodooda badan ayaa tacliintooda sii wata oo raadsada jaamacad, wabarashada xirfada oo heerka sare ah, dib wax u bartaan ama dugsiga sare ee loo yaqaanno jaamacadda ummadda [folkhögskola], kadib markii ay ka qallin-jebiyaan waxbarashada sare ee da'weynta.

Hadba tacliinta qofku doonaayo in uu barto, waa in uu qalma – u haysto aqoonti iyo shuruudihi tacliintaas [behörighet]. Kuwaso noqon karo koorsooyinka qaarkood ee heer dugsi sare ah, ama khibrad shaqo ama laan xirfadeed.

Xulasho

Markii tirada codsadeyaasha ay ka badan tahay tirada boosaska la heli karo, waa in lagu dhaqaaqa xulasho. Caadi ahaan waxaa boosaska la siiyaa ardayada ugu dhibiciyo badan. Dhibicyada ama qiimaha mudnaanta ayaa saldhig u noqon karo shahaadada ka qallin-jebinta waxbarashada da'weynta ee degmada ama natiijada imtixaankii jaamacaddda [högskoleprov]. Waxaa kalo la adeegsan kara wareeysi, warqado shaqsiyeed imtixaanka shaqada

Hogaamiyeha waxbarashada iyo xirfadaha [Studie- och yrkesvägledaren] ee dugsiga joogo ayaa waxbarteha ka caawini karo helida warbixin ku saabsan shuruuda barashada tacliinta kala duwan. Waxaa wanaagsan in hogaamiyeha waxbarashada habsaamid la'aan loola xiriiro, lagana xaajoodo laamaha tacliinta u waxbarteha xiseeynaayo iyo qorsheha tacliinta.

Ogeysiis! Laga bilaawo xilliga sannad-dugsiyeed barkiis ku abaaran xilliga dayrta 2010, waxaa hirgeli doono nidaam cusub ku saabsan helida tacliinta jamacadeed.

Warbixin dheeraad ah:

Warbixin isku-aruursan ee ku saabsan waxbarashada dalka Iswiidan oo idil waxaad ka akhrisan karta Hey'adda ammuuraha dugsiyada [Skolverket] utbildningsinfo.se.
www.utbildningsinfo.se

Hoyga Internetka ee Hey'adda Ammuuraha Jaamacadaha [studera.nu] waxaa ka akhrisan karta warbixin dheerad ah ku sabsan wax ku barashada jaamacadaha iyo imtixaankii jaamacaddda [högskoleprov].
www.studera.nu

Warbixin ku saabsan jaamacadaha ummadda waxaa ka heleysa adeegga warbixinta ee jaamacadaha ummadda.
www.folkhogskola.nu

Warbixin ku saabsan waxbarashada xirfadaha heerka sare waxaa ka akhrisan karta Hey'adda waxbarashada xirfadaha heerka sare.
www.ky.se

Warbixin ku saabsan xirfadaha kala duwan iyo saadinta xaalada suuqa shaqada waxaa ka akhrisan karta hoyga Internetka ee xafiiska shaqada.
www.ams.se

Saamayn ku yeelanshada waxbarashada

Qorsheha waxbarashada waxaa ku xusan in waxbarteyaasha dhamaantood ay saamayn ku yeelan karaan, ka qeybqaadan karaan xilna iska saari karaan hawlaha waxbarashada. Mabda ku dhaqanka dimuqratiyada kuma filna dhigashadiisa oo kaliya ee waa in hab fikradahaas ku salaysan lagu dhaqma.

Sidee saamayn loogu yeelan kara?

Wixii aragti ah oo ku saabsan dhaqdhaqaaqyada waxbarasha dugsiyada waxaa loola xiriiri kara:

- **Macallimiinta** iyo shaqaalaha kale – waa haddii arrinta ay ku saabsan tahay fasalka ama kooxda, dhacdoonka-na u ku aadan yahay maalin waxbarasho.
- **Agaasimaha dugsiga** – haddii arrinta ay ku saabsan tahay dhaqaalaha ama haddii arrintaada shaqaalaha waxba ka qaban karin.
- **Sarkaalka ama siyaasiga degmada ee mas'uul ka ah arrimaha dugsiyada** – waa haddii arrinta ay ku saabsan tahay arrin agaasimaha dugsiga uu san waxba ka qaban karin. Isla mas'uuliyintaas ayaa loola xiriir kara haddii agaasimaha dugsiga uu iska dhegotiraayo aragtidaada.

Qofka an ku qanacsanayn sida aragtidiisa ama dhibaatada jirta wax looga qabtay, ama aaminsan in maamulka degmada usan tixgelin xeer-dugsiyeedka hirgalay wuxuu toos ula xiriiri kara Hey'adda ammuuraha dugsiyada [Skolverket].

Hey'adda ammuuraha dugsiyada [Skolverket] waa hey'adda kormeerida xil-saaran, waxayna kormeerta in dhammaan dadyoowga maamula dhaqdhaqaaqa waxbarasha ay gutaan waajibaadkooda.

Arrimaha qaarkood waxaa lagala xiriiri kara Guddiga Raafcaanka Arrimaha Dugsiyada [Skolväsendets överklagandenämnd] oo ah hey'ad-dowladeed gaar ahaan uga arrinsato go'aamada rafcaanka laga qaatay. Arrimaha badidooda waxay ku saabsan yihiin qaabbilaada ardayda dugsiyada sare iyo qaabbilaada ardayda dugsiyada waxbarashada da'waynta ee degmada (komvux).

Warbixin dheeraad ah:

Ka akhriso hoyga Internetka ee Hey'adda ammuuraha dugsiyada [Skolverket].
www.skolverket.se

Hoyga Internetka ee Guddiga Raafcaanka Arrimaha Dugsiyada
www.overklagandenamnden.se

Haddii ay tiro badan yihiin dadyoowga isku aragtida ah

Hadba tirada sare ee dadyoowga isku aragtida, ayuu hab fudud wax-kabeddelka suurtgal ku noqon kara. Hab wanaagsan oo aragtida shaqsiyeedka lagu dhaqangellin karo, ayaa wuxuu yahay isago wadajir loo soo bandhigo.

Jiritaanka horseedka fasalka iyo horseedka waxbarteha ee waxbarashada da'weynta waajib ma aha, waa in waxbarteyaasha go'aan iskooda ugu gaari karaan. Waxaa habboon in la raadsado warbixin ku saabsan jiritaankta horseedka fasalka iyo horseedka waxbarteha.

Doorashada waxbarashada

Habka saamayn logu yeelan karo waxaa ka mid ah fursadda doorashada isku-dubbarideha waxabarashada. Fursadaan waxay shuruud u yeeleysa tayada dhaqdhaqaaqyada dugsiyada.

Tallaabooyinka ugu wanaagsan ee waxbarteha ku dhaqaaqi karo, ayaa waxay yihiin in u la xiriiro isku-dubbarideha waxabarashada, kadibna uu su'aallo weydiiyo, booqdo, wadahadal la yeesho agaasimaha dugsiga, shaqaalaha iyo dadyoowga kale waxbartaan.

Isku-dubbarideyada waxabarashada dhammaantood, waxay diyaariyaan qorsheha hawlgalka iyo soo bandhigida tayada oo la akhrisan karo. Waxaa kalo la waydiin kara natiijada qiimeynta dhaqdhaqaaqa waxbarasha ee waxbarteyaasha la waydiiyay.

Maxaa saamayn lagu yeelan kara?

Xaq u yeelanshada saamayn ku yeelanshada iyo mas'uuliyada waxbarteha tacliinta oo kaliya ma aha, waxay kalo khuseeysa deegaanka waxbarashada, iyo tusaale buugagga wax lagu barto, jadwalka iyo koorsooyin la heli karo.

Deegaanka waxbarashada

Xeerka deegaanka shaqada [Arbetsmiljölagen] waxaa ku xusan in goobaha wax lagu barto ay yihiin sida goobaha shaqada. Sidaas awgeed deegaanka waxbarashada waa saldhigga horumarka aqoonta waxbarteyaasha.

Xeerka deegaanka shaqada waxaa ku xusan in qofka wax baranaayo uu xaq ku leeyahay saamayn ku yeelanshada deegaanka waxbarashada iyo xaalad waxbarashadiisa.

Qofka an ku qanacsanayn deegaanka waxbarashada, tusaale ahaan kadeedis, buuq, nadaafada iyo hawo qaadashada, wuxuu la xiriiri kara horseedka ardayda ama wakiilka amniga ardayda.

Wakiilka amniga ardayda wuxuu arrinta u gudbin kara agaasimaha dugsiga . Tirada wakiilada amniga ardayda waa hadba tirada waxbarteyaashas iyo xaalada deegaanka waxbarashada.

Haddii arrinta an waxba laga qaban waxaa loola xiriiri kara sarkaalka ama siyaasiga degmada ee mas'uul ka ah arrimaha dugsiyada, goleha waxbarashada, ugu danbeeyntii waxa loola xiriiri kara Hey'adda ammuuraha deegaanka shaqada [Arbetsmiljöverket].

Qorsheha ula dhaqanka wada siman

Dadyoowga dhamaantood waxay xaq ku leeyihiin in ay dareemaan amni markii ay ku sugan yihiin goobaha waxbarashada. Macallimiinta iyo shaqaalaha kale waxaa xil saaran in hab firfircoon ugu hortagan falalka kadeediska iyo meel ka dhaca ku salaysan ee dugsiyada ka dhaca.

Isku-dubbarideha waxbarashada kasta waa in uu diyaariya qorsheha ula dhaqanka wada siman [likabehandlingsplan], kaaso ku xusan sida wax looga qaban doono falalka takoorka iyo meel ka dhaca ku salaysan.

Qorsheha ula dhaqanka wada siman waa in la soo diyaariya oona wadajir waxbarteyaashada u tixraacaan.

Qofka dareemayo kadeedis ama in loo geeystay fal meel ka dhaca ah markii dugsiga u ku sugan yahay, waa in uu macallinkiisa wargeliya. Haddii macallinku u san arrinta waxba ka qaban wuxuu la xiriiri kara agaasimaha dugsiga.

Haddii qofku u aaminsan yahay in isku-dubbarideha waxbarashada usan hab macqul ah wax ugu qaban, waxaa xaaladas loola xiriiri kara wakiilka carruurta iyo ardayda [Barn- och elevombudet] oo waxkaqabdka arrinta ku dhaqaaqi karo. Isla kuwaas ayaa loola xiriir kara haddii macallinku ama shaqaalaha kale ay ka danbeeyan falalka meel ka dhaca ah.

Wakiilka carruurta iyo ardayda waxaa laga helaa Hey'adda ammuuraha dugsiyada, wuxuuna u hawl gala xuquuqda waxbarashada da'weynta.

Isku-dubbarideha waxbarasha waxaa xil-saaran in u ciribtiro kadeediska iyo falka gooni u la dhaqanka ee meel ka dhaca ah, waa mas'uuliyad waxbarteha an saarnayn.

Warbixin dheeraad ah:

Hoyga Internetka dugsiyada loogu talagalay ee Hey'adda ammuuraha deegaanka shaqada [Arbetsmiljöverket] ayaa waxaa laga akhrisan kara warbixin ku saabsan Xeerka deegaanka shaqada, wakiilka amniga ardayda iyo deegaanka waxbarashada dugsiyada loogu talagay dadyoowga waxbarta www.av.se/teman/skolan

Waxaa laga akhrisan kara Wakiilka carruurta iyo waxbartehada, Xeerka amniga carruurta iyo waxbartehada iyo Qorsheha ula dhaqanka wada siman. www.skolverket.se/sb/d/1333

Mas´uuliyadda qofka

Ka-qaybgelidda iyo helidda fursadda saamayn ku yeelanshadu waa arrimo ku xiran is xil-saaridda qofka. Ardayga dhigta waxbarashada dadka waaweyn , waxaa laga sugayaa in uu xil dheeraad ah isa saaro siduu wax u baran lahaa iyo meeshuu wax kub aran lahaa isagoo caawinaad macallinka iyo hogaamiyeha waxbarashada iyo xirfadaha shaqo [Studie- och yrkesvägledaren] ka helaya. Waana in uu si firfircoon ugu hawlgalaa sidii uu waxbarashada ugu guulaysan lahaa.

Joogitaanka fasalka, duruus akhrisashada iyo keenida warbixin shaqsyeedka waa mas´uuliyad saaran waxbarteha. Joogitaanka fasalku qasab maaha waxbarashada dadka waaweyn, laakinse qofka qaata kaalmo-dhaqaale waa laga joojin kara bixinteeda haddii usan dhamaysan koorsada oo aanu goob joog ahayn.

Waxbarashada

Manhajka iyo xeerka dugsiyada waxaa ku xusan in qofka wax-bartaa uu xaq ku leeyahay in uu saamayn ku yeesho waxbarashadiisa.

Xuquuqda saamaynta waxbarasho ee ardayga

Ardayda dhiganaysa waxbarashada dadka waaweyni waxay fursad wayn ku leeyihiin in ay saamayn waxbarashadooda ku yeeshaan, tusaale ahaan waxa ay doonayaan in ay bartaan iyo heerka ay doonayaan. Teeda kale qofku wuxuu kalo xaq ku leeyahay in uu saamayn ku yeesho qaabka iyo waxa ay ka kooban tahay waxbarashadu, oona uu tijaabiyo hawlgallo iyo qaab shaqo kala duwan. Waa in fiirogaar wayn la siiya baahida iyo kartida shaqsiga.

Tusaale ahaan maccallinku waa in uu:

- Wadajir qofka waxbaranaayo u qorsheeyaa oona u qiimeeya wax-barida.
- Dadyoowga an soo bandhigi karin aragtidooda uu ku dhirigeliyo in ay soo bandhigaan.
- U hubsado in waxbarteyaasha dhammaantood ay helaan fursad ay saamayn ku yeeshaan, iyado an fiirogaar ah la siin heerka bulshada u ka tirsan yahay, jinsigiisa, qollada oo ka tirsan yahay, jinsiga u ka helo, lixaadla'aansho, diinta uu aamin san yahay iyo waxa kale u caabudo.